

Cayminta caafimaadka ee helayaasha DACA

Laga bilaabo Noofambar 1, 2024, helayaasha DACA waxay mutaysteen cayminta caafimaadka ee OHP Bridge iyo Marketplace.

Waa maxay Tallaabada Dib loo dhigay ee Imaanshaha Carruurnimada (DACA)?

DACA waa barnaamij fadaraal oo ka ilaaliya dadka qaar bilaa waraabo ah in la tarxiilo. Dadkan muhaajiriinta ah waxay Maraykanka yimaadeen iyagoo carruur ah. Helayaasha DACA way shaqayn karaan dugsina waa aadi karaan. DACA ma aha wax abadi ah. Waxay u baahan tahay in la cusboonaysiiyo laba sano kasta.



Waa maxay Oregon Health Plan (OHP) Plus?

Qorshaha Caafimaadka Oregon (OHP) waa barnaamijka Medicaid ee Oregon waxaana ka mid ah Healthier Oregon. OHP Plus waxay diyaar u tahay carruurta iyo dadka waaweyn iyadoon loo eegin heerka socdaalka. OHP Plus wuxuu caymiyaa daryeelka caafimaadka, ilkaha, iyo habdhaqanka. Xubnuhu waxay galaangal u leeyihiin faa'idooyin dheeraad ah, sida gaadiid geeya ballamaha caafimaadka iyo adeegyada caafimaadka la xiriira. OHP Plus ma jiro kharash xubinta laga rabo. Taasi waxay ka dhigan tahay inaysan jirin lacag joogto loo bixiyo, kharash-wadaag, caymis-wadaag iyo kharashyo mushaharka laga jaro.



Waa maxay OHP Bridge?


Oregon Health Plan (OHP) Bridge waa faa'ido cayminta caafimaadka ah oo cusub oo loogu talagalay dadka waawayn ee dakhligoodu in yar uun ka sarreeyo xadka caadiga ah ee OHP Plus. Waxa waajib ah inaad ku jirto xaalad muhaajirnimo oo mutaysi si aad ugu qalanto, oo ay hadda ka mid yihiin helayaasha DACA. OHP Bridge ma daboosho adeegyada iyo taageerooyinka muddada dheer ama faa'idooyinka cimilada, guryeynta, ama nafaqada. Tabta OHP Plus oo kale, OHP Bridge ma jiro kharash xubinta laga rabo.



Waa maxay Marketplace?

Oregon Health Insurance Marketplace waxay ka caawisaa dadka reer Oregon inay isbarbardhigaan oo isdiiwaangaliyaan qorshayaasha caymiska caafimaadka ee gaarka loo leeyahay. Waa meesha kaliya ee dadka isqoraa ay ka heli karaan caawimo inay iska bixiyaan kharashka cayminta iyo daryeelka caafimaadka. Marketplace-ku si toos ah ayuu ula shaqeeyaa gobolka si uu ugu gudbiyo dadka ay suurto gal tahay inay mutaysteen OHP Plus iyo OHP Bridge. Waxa waajib ah inaad ku jirto xaalad muhaajirnimo oo mutaysi si aad ugu qalanto, oo ay hadda ka mid yihiin helayaasha DACA.

Su'aalo ma qabtaa?

 855-268-3767

 info.marketplace@oha.oregon.gov

Maxay qorshayaashani daboolaan?

Qorshayaasha OHP Plus, OHP Bridge, iyo Marketplace waxay bixiyaan faa'idooyin kala duwan, oo ay ka mid yihiin:

- Baaritaanno iyo daryeel kahortag oo bilaash ah
- Tallaalada
- Daryeelka isbitaalka (booqashooyinka habeen-dhaxa ah iyo kuwa maalintiiba)
- Daryeelka hooyada iyo dhallaanka
- Adeegyada xaaladda gurmada ah
- Baaritaanada shaybaarka, raajada, iyo daawooyinka dhakhtarku qoro
- Adeegyada baxnaaninta iyo taageerada
- Daryeelka caafimaadka maskaxda iyo daaweynta isticmaalka mukhaadaraadka
- Daryeelka ilkaha iyo aragga ee carruurta

Sidee ayaan isku diiwaangeliyaa?

Iyadoon la eegin halkaad ka bilaabayso, waxa laguu gudbin doonaa barnaamijka kugu habboon. Caawimo ayaa lagu heli karaa luuqado badan. Dhammaan wacitaanada gudbinta ah waa la aqbalaa.

OHP Plus iyo OHP Bridge:

- Onlaynka ah benefits.oregon.gov
- Adoo wacaya 800-699-9075
- Fool ka fool ah [Waaxda Oregon ee Adeegyada Aadanaha \(ODHS\) xafiiskeeda \(ohim.info/DHSoffice\)](https://www.ohim.info/DHSoffice)

Cayminta caafimaadka Marketplace:

- Onlaynka ah [HealthCare.gov](https://www.healthcare.gov)
- Adoo wacaya 800-318-2596


Halkeen ka bilaabaa?

Isticmaal qalabkeena Window Shopping si aad u ogaato barnaamijka iyo kaydada aad heli karto. Booqo qalabka [OregonHealthCare.gov/WindowShop](https://www.oregonhealthcare.gov/WindowShop).

Ma ku caawin karaa?

Haa! Caawiyayaasha codsigyada iyo wakiilada caymiska ayaa diyaar u ah inay kaa caawiyaan inaad codsato faa'idooyinka. Bilaash kaga hel caawimo deegaanka ah barta [OregonHealthCare.gov/GetHelp](https://www.oregonhealthcare.gov/GetHelp).

Su'aalo ma qabtaa?

 855-268-3767

 info.marketplace@oha.oregon.gov